JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WASAARADDA WAXBARASHDA, HIDDAHA IYO TACLIINTA SARE

وزارة التربية والثقافة والتعليم العالي

# SIYAASADDA SANDUUQA QARAN EE HORUMARINTA WAXBARASHADA (NEDF)

*November, 2025*

**TUSMO**

1. Hordhac
2. Raadraac iyo sababta loo sameeyey
3. Himilada, Ujeeddooyinka, iyo waxa diiradda la saarayo ee istiraatiijiga ah
4. Qaab-dhismeedka maamul ee sanduuqa qaran ee horumarinta waxbarashada
    4.1. Doorarka Daneeyayaasha Sanduuqa Qaran ee Horumarinta Waxbarashada
    4.2. Hababka Isla-xisaabtanka iyo Kormeerka
    4.3. Ilaalinta Sharciga iyo Hay'adaha
5. Siyaasadda Maalgelinta iyo Abaabulka Kheyraadka
    5.1. Maalgelinta Gudaha
    5.2. Kaqaybgalka Ganacsiyada Gaarka loo leeyahay
    5.3. Ka Faa'iideysiga Tabarrucaadka Qurba-joogta
    5.4. Tabarrucaadka Bulshada iyo Maaliyadda Islaamiga ah
    5.5. Ka-qaybgalka Deeq-bixiyayaasha Caalamiga ah iyo Maalgelin Iskudhaf ah
    5.6. Maalgelinta Hal-abuurka leh iyo Maareynta Halista
6. Soo-jeedimaha Muhiimka ah ee u Baahan Go'aanka Golaha Wasiirada

## Hordhac

Waxbarashadu waa asaaska dhismaha horumarka waara, isku-duubni bulsho iyo baraaraha qaranka. Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay garwaaqsan tahay in maal-gelinta waxbarashadu– gaar ahaan tacliin tayeysan oo xaq-sooran– ay tahay tallaabo dardargelisa kobaca dhaqaalaha, isbeddelka bulshada iyo xasilloonida mustaqbalka fog. In kasta oo dadaalladan la sameeyay ay joogteeyeen jiritaanka waxbarashada, haddana sidaas oo ay tahay, waxa ay sababeen nidaam waxbarasho oo kala daadsan, loo sinnayn oo aan nidaamsanayn.

Dawladda Federalka Soomaaliya oo ay wakiil uga tahay Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare **(WWH&TS),** waxaa si weyn uga go'an abuuridda nidaam waxbarasho loo dhan yahay, islamarkaana xaqsoor iyo adkeysi leh. Sanduuqa NEDF waxa uu u taagan yahay ballan-qaadka Soomaaliya ee ku aaddan dib u dhiska hay'adaha qaranka, kor u qaadista sinnaanta bulshada, iyo gaarista yoolka horumarinta la joogteyn karo (SDG) waxbarasho tayo leh oo ay u dhan yihiin una siman yihiin dhammaan. Waxaa uu u shaqeeyaa sanduuq isbeddel keena, oo lagu hagi karo kheyraadka wadajirka ah ee dawladda, ganacsiyada gaarka loo leeyahay, qurbajoogta, iyo bah-wadaagta horumarinta si loo gaaro yoolka guud ee ah in cunug kasta oo Soomaali ah uu helo fursado waxbarasho oo tayo leh.

## 1. Raadraaca iyo Sababta Loo Sameeyey

Nidaamka waxbarasho ee Soomaaliya waxaa uu weli ka mid yahay kuwa ugu liita caalamka, waxaana raad ku yeeshay colaado socday in ka badan soddon sano, burburka hay'adaha dawladda, iyo dhaqaale liita. Burburkan ku yimid kaabayaasha dadweynaha horaantii **1990**-meeyadii ayaa waxa uu horseeday in waxbarashada tooska ah ay ku dhowaato in ay gebi ahaan burburto. Bulshooyinka, ururro diimeedyada iyo xoogagga aan dawliga ahayn ayaa booska dawladda buuxiyay, oo dhisay iskuullo gaar loo leeyahay iyo kuwo aan toos ahayn. In kasta oo dadaalladan la sameeyay ay joogteeyeen jiritaanka waxbarashada, haddana sidaas ay tahay, waxa ay sababeen nidaam waxbarasho oo kala daadsan, loo sinnayn oo aan nidaamsanayn.

Haddaba, Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare **(MoECHE)** waxa ay Dawlad-Goboleedyada **(FMS)** kala shaqeysaa maareynta waxbarashada. Haseyeeshee, qaab-dhismeedkan iskaashiga ayaa wajahaya kala duwanaanshaha kartida, kheyraadka iyo hirgelinta siyaasadda. Magaalooyinka waaweyn waxa ay ka faa'iidaystaan macaahidda gaarka loo leeyahay, iyadoo degaamada miyiga iyo kuwa gobollada fog fog ay helaan adeegga dawladda oo xaddidan. Sannadkii **2024[ta],** qiyaastii saddex milyan oo carruur ah ayaan iskuul dhigan, waxaana jira tiro badan oo dhallinyaro ah oo aan helin fursadda waxbarasho dugsiga hoose dhexe kadib.. Kooxaha nugul—oo ay ka mid yihiin gabdhaha, carruurta naafada ah, shakhsiyaadka gudaha ku barakacay **(IDPs),** iyo bulshooyinka reer-guuraaga ah—waxa ay caqabado waaweyn kala kulmaan waxbarashada.

Waaxda waxbarashada waxaa sii xannibaya maal-gelin la'aan ba'an. Inkasta oo si tartiib tartiib ah uu dakhliga qaranka u kordhayo, haddanna **waxbarashada waxaa miisaaniyadda qaranka looga qoondeeyay 10.5% kaliya sannadkii 2024, oo aad uga hooseysa heerka ay Hay'adda Waxbarashada, Sayniska iyo Dhaqanka ee Qaramada Midoobay (UNESCO) u xaddiday oo ah 15–20%.** Ku tiirsanaanta xooggan maal-gelinta deeq-bixiyeyaasha ee mashaariicda miisaaniyadda ka baxsan ayaa waxa ay keentay hufnaan la'aan, iswaafajin la'aan iyo lahaanshaha dawladda oo xaddidan. Haddii aan la helin hannaan mideysan oo maal-gelin ah, dhaqaalihii ayaa ku kala firdhaya jidad badan, taas oo wiiqaysa isku-xirnaanta, daahfurnaanta iyo isla-xisaabtanka.

**Dhawrkii sano ee la soo dhaafay, Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare (MoECHE) ee Dawladda Federaalka, Wasaaradda Maaliyadda (MoF) iyo Wasaaradaha Waxbarashada ee Dawlad-Goboleedyada (FMS)** ayaa helay waayo-aragnimo ballaaran iyo waxbarashada tooska ah ee nidaamsan iyaga oo hirgelinaya mashruuca Iskaashiga Caalamiga ah ee Waxbarashada **(GPE)** iyo mashaariicda uu maalgeliyo Bankiga Adduunka. Dadaalladan waxaa ay ku guuleysteen adeegsiga nidaamyada dalka (country system) ee Soomaaliya, gaar ahaan Xisaabta **(Akoonka)** Mideysan ee Khasnadda Qaranka **(TSA),** kaas oo si weyn u sii wanaajiyay hufnaanta, daahfurnaanta, iyo anshaxa maaliyadda amaanada ah. Waayo-araginimadan kaliya ma sii wanaajin isuduwidda dawladaha dhexdooda iyo kartida maareynta maaliyadda dawladda, laakiin waxaa ay sidoo kale dhistay aasaas adag oo loogu talagalay soo bandhigidda wax-ku-oolka ah ee sanduuqa NEDF. Awoodda muuqata ee hay'adahan u leeyihiin maareynta barnaamijyo waxbarasho baaxad weyn leh, oo ay maalgelinayaan deeq-bixiyeyaasha iyada oo loo marayo nidaamyada qaran ayaa dhidibada u taagay hab lagu maal-gelinayo waxbarashada, oo la joogteyn karo, daahfuran, la isu-duway oo hoostaga qaabka guud ee sanduuqa NEDF. Iyada oo laga jawaabayo, Dawladda Federaalka Soomaaliya, oo loo marayo Wasaaradda MoECHE, ayaa waxaa ay bilowday dhismaha **Sanduuqa Qaran ee Horumarinta Waxbarashada (NEDF)**-oo ah hab maaliyad qaran oo loo naqshadeeyay in si daahfuran oo loo siman yahay loo abaabulo, loo ururiyo, oo loo qoondeeyo kheyraadyada ama lacagaha mashaariicda waxbarashada. Sanduuqa NEDF waxa uu la jaanqaadayaa **Qorshaha Istiraatiijiga ah ee Waaxda Waxbarashada (ESSP 2022–2026) iyo Qorshahaha Isbeddelka Qaranka (NTP).** Waxa uu hiigsanayaa in uu yareeyo ku tiirsanaanta deeq-bixiyayaasha, in la hubiyo joogtaynta maaliyadda, iyo in la xoojiyo kalsoonida ay dadweynuhu ku qabaan maalgelinta waxbarashada ee ay dawladdu hoggaamiso.

Sanduuqa NEDF waxa uu u taagan yahay ballanqaadka Soomaaliya ee ku aaddan dib-u-dhiska hay'adaha qaranka, kor-u-qaadista sinnaanta bulshada, iyo gaarista **Yoolka Horumarinta La Joogteyn Karo (SDG) 4: Waxbarasho Tayo leh oo Ay u Dhan Yihiin una Siman Yihiin Dhammaan**. Waxaa uu u shaqeeyaa sanduuq isbeddel keena ahaan, oo lagu hagi karo kheyraadka wadajirka ah ee dawladda, ganacsiyada gaarka loo leeyahay, qurba-joogta, iyo bah-wadaagta horumarinta si loo gaaro yoolka guud ee ah in cunug kasta oo Soomaali ah uu helo fursado waxbarasho oo tayo leh.

## 2. Himilada, Ujeeddooyinka iyo Waxa Diiradda La Saarayo ee Istiraatiijiga ah

Himilada Sanduuqa NEDF waa in la dhiso hab maaliyadeed adkaysi leh, hufan, oo waara, kaas oo dammaanad qaadaya in dhammaan carruurta Soomaaliyeed ay helitaanka waxbarasho tayo leh, loo dhan yahay, oo sinnaan ku dhisan.

### Ujeeddooyinka Istiraatiijiga ah:

- Ballaarinta ilaha kala duwan ee maal-gelinta iyada oo lagu darayo dakhliga gudaha, tabarrucaadda qurbajoogta, maal-gashiga ganacsiyada gaarka loo leeyahay, iyo gargaarka caalamiga ah iyada oo la adeegsanayo qaab qaran oo mideysan.
- Sii wanaajinta daahfurnaanta iyo Isla-xisaabtanka iyada oo loo marayo la socoshada maaliyadaha waqtiga la joogo ama tooska ah, baaritaanno madaxbannaan, iyo warbixinno dadweynaha u furan.
- Kor-u-qaadista sinnaanta iyo u-dhammaanshaha iyada oo kheyraadyada lagu hagaajinayo bulshooyinka la faquuqo iyo kuwa adeegyadu ay ku yar yihiin.
- Xoojinta horumarinta macallinka iyo tayada waxbarashada iyada oo la joogteynayo maal-gelinta tababarka, agabka, iyo jaan-gooyooyinka.
- Hubinta joogteynta muddada dheer iyada oo hawlgallada sanduuqa NEDF la dhexgalinayo gudaha nidaamyada Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha (PFM) iyo kor-u-qaadista anshaxa maaliyadda.

## Qeybaha Muhiimka ah in La Maal-geliyo:

a. **Horumarinta Cudadda Macallimiinta:** Kor-u-qaadista aqoonta macallimiinta, mideynta shahaadooyinka, iyo xoojinta macallimiinta loo dirayo ama la geynayo deegaamada miyiga ah iyo kuwa ay colaaduhu saameeyeen.
b. **Horumarinta Kaabayaasha:** Dhisidda iskuullo cusub, dayactirka kuwa hadda dhisan, iyo xaqiijinta tas-hiilaadyada Biyaha, Fayo-dhowrka, iyo Nadaafadda **(WASH)** ee dhammaan xarumaha waxbarashada.
c. **Agabka Barashada iyo Hal-abuurka Dhijitaalka ah:** Bixinta buugaagta aqriska, agabka kaaba barashada, iyo dhexgelinta tiknoolajiyadda waayo-aragnimada barashada ee casriga ah.
d. **Barnaamijyada Sinnaanta iyo U-dhammaanshaha:** Ballaarinta deeqaha waxbarashada, barnaamijyada quudinta iskuulka, iyo dedaallada waxbarashada gaarka ah ee loogu talagalay carruurta naafada ah iyo ardayda barakacayaasha ah.
e. Maamulka waxbarashada

**Himilada Muddada Dhexe:**

Marka la gaaro **sannadka 2030,** sanduuqa NEDF waxa uu ku hamminayaa nidaam waxbarasho oo la heli karo, loo dhan yahay, oo la jaanqaadaya ajendaha ballaaran ee Soomaaliya, ee horumarinta awoodda aadanaha. Sanduuqa waxaa uu hiigsanayaa in la dhimo tirada carruurta aan iskuulka dhigan oo ay noqoto wax ka yar 25%, in la gaaro sinnaanta jinsiga, in la ballaariyo waxbarashada carruurta yaryar, iyo in la dhiso cududda macallimiin qaran oo ka badan **80,000 (sideetan Kun)** oo macallimiin aqoon leh. Sidaa si la mid ah, sanduuqa NEDF waxa uu ku hamminayaa in la xoojiyo dadaallada lagu siinayo fursad labaad oo waxbarasho dadka aan helin waxbarashada tooska ah, iyada oo loo marayo waxbarashada xirfadaha iyo farsamada gacanta, barnaamijyada akhris-qoraalka ee dadka waaweyn, iyo tababbarrada xirfadeed si ay uga qeyb qaataan kobaca dhaqaale ee dalka. Dhinaca tacliinta sare, sanduuqa NEDF waxa uu hiigsanayaa in la dhiso nidaam tacliin sare, adkaysi leh oo la tartama caalamka, kaas oo horumariya cilmibaarista, hal-abuurka, iyo xirfadaha loogu talagalay isbeddelka qaran**.**

## 3. Qaab-dhismeedka Maamul ee Sanduuqa Qaran ee Horumarinta Waxbarashada

Qaab-dhismeedka maamulka ee sanduuqa NEDF waxaa loo qaabeeyey **hannaan lagu xaqiijinayo hufnaanta, ka-qeybgalka, daahfurnaanta, iyo isla-xisaabtanka** heer kasta oo maamul. Qaabkan waxaa laga soo qaatay hab-dhaqannada ugu wanaagsan ee caalamiga ah, sida kuwa ay isticmaalaan **Iskaashiga Caalamiga ah ee Waxbarashada / Global Partnership for Education (GPE),** Sanduuqa **Education Cannot Wait (ECW)**, iyo sanduuqyada qaran ee waxbarashada kale ee ka jira dalalka gobolka sida Rwanda iyo Tanzania.

### 3.1. Doorarka Daneeyayaasha Sanduuqa Qaran ee Horumarinta Waxbarashada

Guusha hawlgalka iyo istiraatiijiyadda sanduuqa NEDF ee Soomaaliya waxa ay ku xiran tahay qeybinta joogtada ah, qeexidda, iyo dhaqan-gelinta waajibaadka hay'adaha oo laga dhaqan-gelinayo heer federaal iyo heerarka hoose ee dawladda. Qaab maamul loo dhan yahay oo si wanaagsan la isku dubbariday ayaa muhiim u ah kor-u-qaadidda wax-ku-ool-nimada iyo hufnaanta, ku dhisidda islaxisaabtan, lahaanshaha, iyo wax-ka-qabashada ee gudaha habdhiska waxbarashada. Doorarka iyo mas'uuliyadaha hay'adaha daneeyayaasha muhiimka ah ee ka tirsan habdhiska sanduuqa NEDF waa sida soo socota:

1. **Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare (MoECHE):** Ilaaliyaha ugu weyn iyo guddoonka sanduuqa NEDF ahaan, Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare **(MoECHE)** waxa ay xaqiijisaa in jihada istiraatiijiga ah ee NEDF ay la jaanqaaddo siyaasadda waxbarasho ee guud iyo ajendaha horumarineed ee Soomaaliya. Wasaaradda MoECHE waxa ay guddoomisaa Guddiga Haga NEDF **(NEDF-SC),** waxayna martigelisaa Xoghaynta Farsamada ee NEDF **(NEDF-TS).** Sidoo kale, waxa ay dammaanad-qaaddaa in ay waafajiso siyaasadaha waxbarasho ee mudnaanaha heer qaran, gaar ahaan kuwa lagu caddeeyay Qorshaha Istiraatiijiga ah ee Waaxda Waxbarashada ee Soomaaliya **(ESSP),** Qorshaha Isbeddelka Qaranka **(NTP),** iyo sidoo kale la jaanqaadidda qaab-dhismeedyada caalamiga ah sida Yoolka Horumarka Waara ee SDG 4.

2. **Wasaaradda Maaliyadda:** Wasaaraddan waxa ay xaqiijisaa joogtaynta maaliyadeed iyo daacadnimada, hufnaan, iyo mas'uuliyadda buuxda ee lagu maareeyo sanduuqa NEDF, iyada oo la dhexgalinayo qaab-dhismeedka miisaaniyadaha heer qaran iyo heer dawlad-goboleed. Waxa ay fududaysaa la-socoshada maaliyadda dawladda/dadweynaha, dabagalka kharashaadka, iyo qoondeynta daahfuran ee kheyraadka iyada oo loo marayo Qaab-dhismeedka Kharashaadka Muddada Dhexe **(MTEFs),** calaamadeynta miisaaniyadda, iyo taageeridda hababka maal-gelinta ku saleysan natiijooyinka. Iskaashiga ay Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare **(MoECHE)** la yeelanayso waa mid aad muhiim u ah si maalgelinta waxbarashada loogu dhex daro qorsheynta dhaqaalaha guud ee dalka.

3. **Wasaaradaha Waxbarashada Dawlad-goboleedyada:** Wasaaradahan waa fuliyeyaasha ugu waaweyn ee sanduuqa NEDF ee heer gobol, iyaga oo la jaanqaadaya kana shaqeynaya istiraatiijiyadaha waxbarashada ee heer qaran si ay uga tarjumaan xaqiiqooyinka dhabta ah ee gobollada ka jira. Waxa ay hormuud u yihiin hirgelinta barnaamijyada uu sanduuqa NEDF taageero ee heer gobol, waxa ayna xaqiijiyaan in adeegyada waxbarasho si caddaalad ah loo gaarsiiyo dhammaan bulshada. Sidoo kale, waxa ay ku biiriyaan aragtiyo dhab ah iyo jawaab-celin siyaasadeed oo wax-ku-ool ah oo lagu hormarinayo wada-hadalka heer qaran.

4. **Ururrada Bulshada Rayidka ah (CSOs):** Ururrada Bulshada Rayidka ah **(CSOs)** ayaa door muhiim ah ka ciyaara iyaga oo ah wakiillada isla-xisaabtanka iyo la hawlgalayaasha adeeg-bixinta ee gudaha qaab-dhismeedka sanduuqa NEDF. Waxa ay si cad u muujiyaan baahiyaha waxbarasho ee ka jira heerka hoose ee bulshada, waxayna u doodaan dadka laga tirada badan yahay ama aan si buuxda uga faa'iideysan adeegyada waxbarasho. Sidoo kale, waxay hirgeliyaan barnaamijyo si gaar ah ugu saleysan baahiyaha deegaanka. Waxa ay sidoo kale gacan ka geystaan xoojinta daahfurnaanta iyada oo loo marayo hababka isla-xisaabtanka bulshada, waxa ayna ka qaybqaataan wadahadalka siyaasadeed si loo hubiyo in sanduuqa NEDF uu sii ahaado mid u furan bulshada oo ka jawaabeya baahiyaha dhabta ah.

5. **Ururrada Macallimiinta:** Ururrada macallimiintu waa daneeyayaal muhiim ah oo door weyn ka ciyaara qaabaynta xiriirka shaqo, horumarinta xirfadda, iyo hagaajinta xaaladaha shaqo ee ka jira qeybta waxbarashada. Ka qeybgalkooda waxa uu xaqiijiyaa in daryeelka iyo danaha macallimiinta la hormariyo marka la qoondeynayo kheyraadka, waxa ayna gacan ka geystaan wada-naqshadeynta qaab-dhismeedka Horumarinta Xirfadda Joogtada ah **(CPD)** iyo tubta horumarka xirfadaha macallimiinta.

6. **Qeybaha/Ganacsiyada Gaarka Loo Leeyahay:** Qeybaha gaarka loo leeyahay waxaa loo arkaa in ay yihiin bahwadaag dhiirrigelinaysa hal-abuurka iyo ballaarinta bixinta adeegyada waxbarasho ee hoos yimaada sanduuqa NEDF. Iyada oo loo marayo iskaashiyada dawladda iyo qeybaha gaarka loo leeyahay **(PPPs),** dadaallada mas'uuliyadda bulshada ee shirkadaha **(CSR),** iyo xalalka tiknoolajiyadeed, ayaa qeybaha gaarka loo leeyahay waxaa ay ka qeybqaadan karaan horumarinta kaabeyaasha waxbarasho, madalaha waxbarasho ee dhijitaalka ah, iyo qaabab kale oo maal-gelin ah, oo beddel u ah kuwa caadiga ah.

7. **Bahwadaagta Horumarinta:** Bahwadaagta horumarinta, oo ay kamid yihiin hay'adaha caalamiga ah ee dhinacyada badan leh, deeq-bixiyeyaasha laba-geesoodka ah, iyo NGO-yada caalamiga ah, ayaa waxa ay door muhiim ah ka ciyaaraan maal-gelinta iyo bixinta taageerada farsamo ee qeybta waxbarashada ee Soomaaliya. Waxa ay ku biiriyaan aragtiyo istiraatiiji ah, waxa ayna mudnaanta deeq-bixiyeyaasha waafajiyaan siyaasadaha qaran, waxa ay soo bandhigaan agab aqooneed, cilmibaaris siyaasadeed, iyo hal-abuurro gacan ka geysta go'aan qaadasho ku saleysan caddeymo.

### 3.2. Hababka Isla-xisaabtanka iyo Kormeerka

Si loo xaqiijiyo ku kalsoonaanta, daahfurnaanta, iyo hufnaanta sanduuqa NEDF, waxaa la dhisi doonaa qaab-dhismeed kormeer iyo isla xisaabtan oo heerar badan leh oo si rasmi ah loo hirgeliyo. Qaabkan wuxuu isku daraa kormeer siyaasadeed oo heer-sare ah, baaris madax bannaan, ka qaybgalka bulshada, iyo daahfurnaanta tiknoolajiyadeed, taas oo abuureysa nidaam dhammeystiran oo yareynaya halista maareynta hantida **(fiduciary risks),** oo xoojinaya kalsoonida ka dhaxeysa daneeyayaasha.

1. **La-socosho Istiraatiiji ah oo Loo Marayo Guddiga Haga oo Heer-Sare:** Guddiga Haga ee Heer Qaran waxa uu bixin doonaa hagid istiraatiiji ah, waxa uu ansixin doonaa siyaasadaha, waxa uu xaqiijin doonaa in ay la jaanqaadaan mudnaanaha waxbarasho ee qaran, waxa uuna di-bu-eegi doonaa warbixinaha horumarka ee muddo kadibba mar la sameeyo.

2. **Baaritaanno Maaliyadeed iyo Mid Waxqabad oo Madax-bannaan:** Baaritaanno sanadle ah oo ay sameeyaan shirkado baaris/hantidhawr dhinac-saddexaad oo la xaqiijiyay ayaa ilaalin doona daacadnimada maaliyadeed waxayna xaqiijin doonaan in kheyraadka si caqli ku dhisan loo isticmaalo, iyada oo waxyaabihii la ogaaday lagu daabici doono barta daahfurnaanta sanduuqa NEDF.

3. **Korjoogteynta Bulshada Ku Saleysan iyada oo loo marayo Guddiyada Waxbarashada Degaanka:** Guddiyada Waxbarashada ee Degaanka waxa ay korjoogteyn doonaan mashaariicda dhismaha, waxa ay xaqiijin doonaan in agabka iskuullada si sax ah loo keenay, waxa ayna hubin doonaan deeqaha waxbarasho ama gargaarka in si caddaalad ah loogu qaybiyo ka-faa'iideystayaasha.

4. **Hirgelinta Hababka Ilaalinta Dadka Soo Sheega musuqmaasuqa ama khaladaadka:** Waxaa la sameyn doonaa madal ammaan ah oo qarsoodi ah oo loogu talagalay dadka soo sheega musuqmaasuqa ama khaladaadka (whistleblowers), taas oo lagu maamulo siyaasad adag oo xog ilaalin ah, isla markaana la jaanqaadaysa sharciyada qaranka ee ka hortagga musuqmaasuqa.

5. **Daah-furnaanta Waqtiga La joogo oo loo marayo Baro Dhijitaal ah:** Madal daahfuran oo dhijitaal ah oo leh shaashado guud oo waqtiga la joogo ah oo muujinaya bixinta dhaqaalaha, heerka hirgelinta mashruuca, cabbirrada waxqabadka goobta gaarka u ah, iyo natiijooyinka baarista ayaa kor u qaadi doonta maamulka furan iyo kalsoonida dadweynaha.

### 3.3. Ilaalinta Sharciga iyo Hay'adaha

Sanduuqa waxaa si rasmi ah loo hirgelin doonaa iyada oo loo marayo Go'aan Siyaasadeed oo ka soo baxa Golaha Wasiirrada, kaas oo lagu aasaasayo Sanduuqa Qaran ee

Horumarinta Waxbarashada, laguna caddeynayo waajibaadkiisa, madaxbannaanidiisa hawlgal, iyo heerarka maamulka maaliyadeed ee la raacayo. Siyaasaddan waxa ay la jaanqaadaysaa Xeerka Maamulka Maaliyadda Dawladda/Dadweynaha ee Soomaaliya **(PFM Act, 2019)** iyo Siyaasadda Qaranka ee Ilaalinta Bulshada **(2023).** Aasaaskan sharciyeed waxa uu dammaanad qaadayaa joogteynta Sanduuqa iyo in laga ilaaliyo faragelin siyaasadeed.

## 4. Siyaasadda Maal-gelinta iyo Abaabulka Kheyraadka

Joogteynta muddada-dheer ee Sanduuqa Qaran ee Horumarinta Waxbarashada Soomaaliya **(NEDF)** wuxuu ku xiran yahay qaab maal-gelin oo kala duwan oo adkaysi leh. Tobannaan sano, waaxda waxbarashadu waxay si weyn ugu tiirsanayd gargaar dibadeed oo aan la saadaalin karin, taas oo muujinaysa baahida loo qabo in loo guuro maalgelin gudaha ah oo waarta. Sanduuqa NEDF wuxuu mudnaan siin doonaa abaabulka dhaqaalaha gudaha iyo kordhinta miisaaniyadda dawladda ee lagu bixiyo kharashaadka guud ee waxbarashada. Ilaha dakhliga gudaha ee hal-abuurka leh, sida canshuur gaar u ah waxbarashada iyo tabarrucaadka bulshada, ayaa xoojin doona salka sanduuqa.

In kasta oo taageerada deeq-bixiyeyaasha caalamiga ah ay weli muhiim tahay, haddana gargaarka gooni gooniga ah ee mashruuca ku saleysan waa in loo beddelaa habab mideysan oo wadajir ah, iyada oo la raacayo tusaaleyaal guuleystay sida GPE iyo ECW. Isuduwidda noocan ah waxa ay kor u qaadaysaa saadaalinta, isku xirnaanta, iyo saameynta. Qurba-joogta Soomaaliyeed, ee sannad walba dalka u soo dirta ilaa **$2** bilyan, waxa ay ka dhigan tahay fursad weyn oo aan wali si buuxda looga faa'iideysan. Deymo si nidaamsan looga qaato qurbajoogta, madalo lacag ururineed **(crowdfunding)**, iyo iskaashiyo u dhexeeya dawladda iyo ganacsiyada gaarka loo leeyahay **(PPP),** ayaa gacan ka geysan kara in la hago maal-gelintan waxbarashada. Maaliyad dheeraad ah—sida maal-gelin natiijooyin ku saleysan **(RBF)** iyo maaliyadaha waqafka waxbarashada— waxa ay keeni doonnaan kala duwanaanta ilaha kheyraadka waxa ayna yareyn doonaan saameynta is-bed-bedelka dhaqaale.

### 4.1. Maal-gelinta Gudaha

Maal-gelinta gudaha waxa ay udub dhexaad u tahay lahaanshaha qaran iyo yareynta ku tiirsanaanta deeqaha dibadda. Hadda, waaxda waxbarashada waxa ay heshaa **qiyaastii 10.5%** oo ka mid ah miisaaniyadda qaranka, taas oo aad uga hooseysa heerka lagu taliyey ee u dhexeeya **15–20%. Qaabka Guud ee Maal-gelinta Waxbarashada Soomaaliya (2024)** waxa uu ballan-qaadayaa in la kordhiyo saamigan, oo la gaarsiiyo ilaa **20% marka la gaaro sannadka 2030,** iyada oo lagu taageerayo dib-u-habeynta Maareynta Maaliyadda Dawladda/Dadweynaha **(PFM)** iyo la-socoshada baarlamaanka. Sanduuqa NEDF waxa uu raaci doontaa hab dhawr qaybood ka kooban oo isku-daraya **u-qareemaynta siyaasad, canshuuro gaar u ah waaxda tusaale ahaan (isgaarsiinta iyo kastamka), iyo Habka Isku-dheellidda ama Simidda Maaliyadda Waxbarashada / Equalization Mechanism for Education (FEME)** si loo xaqiijiyo sinnaanta gobollada dalka oo dhan. Dabagalka dhijitaalka ah ee loo marayo **Nidaamka Maamulka Macluumaadka Maaliyadeed ee Soomaaliya (SFMIS**) iyo baaritaanno ay muwaadiniinta hoggaaminayaan ayaa xoojin doona daahfurnaanta.

### 4.2. Ka-qeybgalka Ganacsiyada Gaarka Loo Leeyahay

Ganacsiyada gaarka loo leeyahay waxa ay durba si dadban u taageeraan waxbarashada, laakiin waxaa loo baahan yahay isuduwid nidaamsan. Istiraatiijiyadda Ka-qeybgalka Ganacsiyada Gaarka Loo Leeyahay ee Sanduuqa NEDF **(PSES)** waxa ay dhiirrigelin doontaa tabarrucaadka iyada oo loo marayo canshuur-dhaaf, deeqo u dhigma deeqaha laga helay ilaha kale (matching grants), iyo waajibaadyada la xiriira Mas'uuliyadda Bulshada ee Shirkadaha **(CSR).** Iskaashiyada u dhexeeya dawladda iyo ganacsiyada gaarka loo leeyahay **(PPP)** ayaa mudnaan gaar ah loo siin doonaa dhismaha iskuullada, barashada dhijitaalka ah, iyo tababarka macallimiinta, iyadoo la hagayo Madal Wadajir ah oo ay ka qeyb-galayaan daneeyayaal kala duwan si loo hubiyo in hawlahaasi ay waafaqsan yihiin mudnaanaha qaran.

### 4.3. Ka Faa'iideysiga Tabarrucaadka Qurba-joogta

Iyadoo lacagaha ay dibadda ka soo diraan qurba-joogta Soomaaliyeed ay ka dhigan yihiin ku dhowaad 30% ee dakhliga guud ee dalka (GDP), qurba-joogtu waa il dhaqaale muhiim ah oo wax ka beddelaysa maalgelinta waxbarashada. Sanduuqa NEDF wuxuu soo

bandhigi doonnaa Warqado Caddeynaya Deynta ay Qurba-joogta Ku Bixisay Waxbarashada Education Diaspora Bonds (EDBs), lacago loogu talagalay waxbarashada oo dibadaha laga soo diro, iyo madal dhijitaal ah oo la yiraahdo— “EdFund Somalia” —si qurbajoogta u bixiso tabarrucaad toos ah. Guddiyada Waxbarashada ee Qurbajoogta Gobollada/Regional Diaspora Education Committees (RDECs) waxaa ay abaabuli doonnaan ka-qeybgalka bulshooyinka si loo hubiyo isla-xisaabtan iyo ka-qeybgal joogto ah.

### 4.4. Tabarrucaadka Bulshada iyo Maaliyadda Islaamiga ah

Bulshooyinka ayaa taariikh ahaan taageeray nidaamyada waxbarashada ee maxalliga ah. Sanduuqa NEDF ayaa sharciyeyn doonna ama nidaamka waafajin doonna dadaalladan iyada oo loo marayo Guddiyada Waxbarashada Bulshada **(CECs)** iyo Qorshayaasha Horumarinta Iskuullada **(SIPs)** kuwaas oo lagu darayo dhaqaalaha laga ururiyo degaanka. Nidaamka maaliyadda Islaamiga ah—sida sakada iyo waqafka. Kuwan ayaa la ururin doonaa, waxaana lagu dari doonaa Sanduuqa Qaranka ee Waxbarashada Loo Qoondeeyey **(NEDF)** oo leh deeqo u dhigma oo waxqabad ku saleysan, daahfurnaan si kor loogu qaado lahaanshaha bulshada degaanka.

### 4.5. Ka-qeybgalka Deeq-bixiyayaasha Caalamiga ah iyo Maalgelin Iskudhaf ah

Taageerada deeq-bixiyeyaasha ayaa weli ah mid aad muhiim u ah iyada oo la eegayo dhaqaalaha xaddidan ee Soomaaliya. Si saameynta loo kordhiyo, taageerada ayaa lagu mideyn doonaa Sanduuqa Qaran ee Horumarinta Waxbarashada (NEDF) oo diiradda saaraya mudnaano gaar ah. Kormeerka Guddiga Haga Sanduuqa NEDF oo Daneeyayaal Badan ka kooban, oo taageero ka helaya lasocoshada SFMIS ee waqtiga la joogo ah iyo baaritaannada madaxbannaan, ayaa koruqaadi doona daahfurnaanta, yareynta ku-celcelinta, iyo hubinta waafaqsanaanta nidaamyada qaran.

### 4.6. Maal-gelinta Hal-abuurka leh iyo Maareynta Halista

Sanduuqa NEDF waxa uu raadin doonaa warqado deyn dowladeed oo waxbarashada lagu maal-gelinayo, maal-gelin la xiriirta cimilada, iyo waqafka si loo ballaariyo awoodda miisaaniyadeed. Sanduuq Lacag Kayd **10** sano ah iyo Bayaanka Siyaasadda Maal-gashiga

**(IPS)** ayaa hagi doona maareynta hantida iyo xasilloonida maaliyadeed. Maareynta halista oo loo marayo qorsheynta xaalad la hal-abuuray iyo tijaabinta culeyska si looga hortago gilgilaadaha.

## 5. Soo-jeedimaha Muhiimka ah oo u Baahan Go'aanka Golaha Wasiirada

- **Ansixinta Tilmaanta Siyaasadda Sanduuqa Qaran ee Horumarinta Waxbarashada** si loo sharciyeeyo dhismaha sanduuqa.
- Oggolaanshaha in la dhiso **Guddiga Haga NEDF iyo Xoghaynta Farsamo.**
- Ballan-qaadka miisaaniyad kordhin horey u socoto si loo **gaaro 20% ee kharashaadka qaran ee waxbarashada marka la gaaro 2030**.
- Dhiirrigelinta iskaashiyada lala yeelanayo **qaybta gaarka loo leeyahay, qurbajoogta, iyo bahwadaagta caalamiga ah** si loo helo maal-gelin wadajir ah iyo hal-abuur.
- **Caadiyeynta hababka daahfurnaanta** oo ay ka mid yihiin shaashadaha guud ee dhijitaalka ah, baarista dadweynaha, iyo kormeerka bulshada.